| Washington State Department of Social & Health Services — Transforming lives | # Xuquuqahaaga iyo Masuuliyadahaaga Marka Aad Hesho Adeegaha Laga bixiyo dhinaca Maamulka Taageerada Mudada-Dheer iyo Da'weynaanta iyo Maamulka Horumarinta Naafooyinka<br>**Your Rights and Responsibilities When You Receive Services Offered by Aging and Long-Term Support Administration and Developmental Disabilities Administration** | MAGACA MACMIILKA<br><br>LAMBARKA AQOONSIGA EE ACES |
|---|---|---|

### Adeegyada La Heli Karo

Waxaad xaq u leedahay in aad kala doorato adeegyada aad xaqa u leedahay in aad hesho. Adeegaha waa kuwo iskaaga ah. Adeegaha ay bixin karaan Maamulka Taageerada Mudada-Dheer iyo Da'weynaanta (ALTSA) iyo Maamulka Horumarinta Naafooyinka (DDA) waxaa dhici karta in aysan kugu caawin dhammaan baahooyinkaaga.

Maamulka Taageerada Mudada-Dheer iyo Da'weynaanta iyo Maamulka Horumarinta Naafooyinka waxay adeegaha kubixiyaan gudaha:

- Qoyska Guriga Qofka Weyn, Xarunta Caawimaada Nolosha, Xarunta Adeegaha Horumarsan, Xarunta Kalkaalinta, Guri Saaxiib, Guriga Xanaanada Caruurta, Guriga Ay Deganyihiin Shaqaalaha Rukhsadaysan ee Caruurta; Guryaha Kooxda Horumarinta Naafooyinka, ICF/IDs; AMA
- Guriga uu qofku iska leeyahay. **Fiiro gaar ah:** Maamulka Taageerada Mudada-Dheer iyo Da'weynaanta iyo Maamulka Horumarinta Naafooyinka ma bixiyaan adeegaha daryeelka shakhsiga maalinta/24 saac labixiyey. Haddii loo baahanyahay daryeelka 24 saac markaasi waxaa la tixgelin karaa doorashooyin adeeg kale.

Maamulahaaga Kiiska AAA, Maamulaha Xogta Kiiska Maamulka Horumarinta Naafooyinka, ama Takhasuslaha Adeega Bulshada ee Adeega Daryeelka Caafimaadka ee dukumeentigaan loogu yeero **shaqaalaha kiiska**.

### Xuquuqahaaga

Waxaad xaq u leedahay in:

- Laguula dhaqmo si sharaf, xushmad iyo cunsuriyad la'aan ah;
- Laga dhigo macluumaada adiga kugu saabsan mid sir ah oo keliya loo isticmaalo xuduudaha sharciga uu qabo iyo xeerarka Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS);
- Waa in aanan lagu xadgudbin, dayacin, maaliyad ahaan la dhiigmiiran, ama waa in aan laga dayrin. Si aad u hesho sharraxaadda shuruudahan, booqo: https://www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/types-and-signs-abuse. Haddii adiga ama qof aad taqaanid lagu xadgudbey, la dayacey ama la dhiigmiirtey, fadlan ka wac Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada lambarkan lacag la'aanta ah 1-866-(End Harm) / 1-866-363-4276 si aad ula hadasho shaqaale ku caawin kara;
- Loola dhaqmo hantidaada si ixtiraam leh;
- Laguu sheego dhammaan waxyaabaha ku saabsan adeegyada aad heli karto iyo in aad sameyso doorashooyin ku saabsan adeegyada aad doonaysid ama aadan doonayn;
- Aad si iskaashi ah ugula shaqaysid shaqaalaha kiiskaaga qorsheynta daryeelkaaga;
- Aan laguugu qasbin in aad ka jawaabtid su'aalaha ama in aad sameysid wax aadan doonaynin in aad sameysid;
- Lagu sheegay qoraal go'aanada wakaaladda ah kadibna qaado nuqul kusaabsan gunaanadka qorshahaaga taageerada ama qorshahaaga daryeelka;
- La hadal horjoogaha haddii aan adiga iyo shaqaalahaaga kiiska oggolaanin arintaas;
- Codsato dhageysiga maamul la xiriirra xitaa haddii aad hore u samaysay cabasho;
- Sameyso cabasho adiga oo aan ka cabsan in dhibaato laguu gaysto xitaa haddii aad codsatay dhageysiga maamul la xiriira;
- La hadal qareen adiga oo waca 1-888-201-1014;
- Diid dhammaan adeegaha;
- Hayso adeegaha turjumaanka adiga laguu siiyo si lacag la'aan ah haddii aadan ugu hadli karin ama u fahmi karin luuqada Ingiriisiga si fiican;
- Dooro, buri ama bedel deryeel bixiyaha u qalma; kadibna
- Qaado natiijooyinka baaritaanka asalka lagu sameeyo qofkasta oo daryeel bixiye khaas ah oo aad adigu dooratid.

### Masuuliyadahaaga

Waxaad leedahay masuuliyada in aad:

- U oggolaato shaqaalaha kiiska in uu kuugu buuxiyo qiimeyntaada ugu yaraan sannad ahaan meel adiga kugu habboon;
- U oggolaatid shaqaalaha kiiska in uu arko deegaanka aad kunooshahay ugu yaraan si sannadle ah;
- Nasiisid macluumaad nagu filan si aynu u buuxino qiimeyntaada;
- U sheegtid shaqaalaha kiiskaaga haddii uu qofkale kuu sameeyo ama kuu gaaro go'aanada maaliyeed ama caafimaad;
- Kaqayb gashid horumarinta lagu sameeyo qorshaha daryeelkaaga ama taageerada, kadibna sixiixdid;
- Fahantid in daryeel bixiyahaaga aan lacag lagu siinin adeegaha ama saacadaha aan la oggolaanin;
- Dooratid daryeelkaaga caafimaadka khaaska kuu ah;
- Dooratid daryeel bixiye u qalma;
- Bixisid meel shaqo ammaan ah;
- Kadhiga baaritaanada asalka daryeel bixiyaha kuwo khaas am sir ah;
- U sheeg shaqaalahaaga kiiska haddii aad ku qabtid wax dhibaato ah daryeel bixiyahaaga ama haddii aadan qaadanin saacadaha uu sheegay daryeel bixiyahaaga;
- Lacag sii daryeel bixiyahaaga bil kasta haddii laguugu caawiyo in aad bixiso daryeelkaaga;
- Ha u dhaqmin qaab kadhigaysa qofkasta in uu khatar galo; iyo
- U sheeg shaqaalaha kiiska haddii uu jiro isbedel ku dhaca:
  - ✓ Xaalada caafimaadkaaga;
  - ✓ Caawimaada aad kaheshid qoyska iyo wakaalado kale;
  - ✓ Halka aad kunooshahay; ama
  - ✓ Xaaladaada maaliyadeed.



Barcode label

16172

## Mas'uuliyadaha Shaqaalaha Kiiska

Shaqaalahaaga kiiska ayaa wuxuu mas'uul ka yahay in uu:

- Kuula dhaqmo si xushmad iyo ixtiraam leh;
- Ilaaliyo khusuusiyaadkaaga;
- Kuu sheego waxa ay kuu qaban karaan ama aan kuu qaban karin Maamulka Taageerada Mudada-Dheer iyo Da'weynaanta iyo Maamulka Horumarinta Naafooyinka;
- Helo macluumaad adiga kugu saabsan iyo kuwo kale si loogu sameeyo qiimeyn kadibna loo xadido loona go'aansado waxa ay yihiin adeegaha aad dooran karto.
  - ✓ Qiimeynta waxaa kamid noqon doona meelaha aad kufiicantahay, xuduudahaaga, ahdaaftaada, iyo waxyaabaha aad jeceshahay.
  - ✓ Qiimeynta waxaa kamid noqon doona caawimaada aad marhore kahelaysay ama aad kaheli karto dhinaca qoyska ama wakaalado kale iyo sida aad u doonaysid in adeegaha loo sameeyo;
- Kugu caawiyo in aad horumarisid qorshe daryeel ama qorshe taageero midkaas oo sheega caawimaad ay lasocoto daryeelka shakhsiga ah oona kamid yihiin ahdaaftaada shakhsiyeed, waxyaabaha aad jeceshahay, iyo doorashooyinka;
- Helo macluumaad adiga iyo dadka kale kusaabsan si loo cusboonaysiiyo qorshahaaga daryeelka ama qorshahaaga taageerada sannad kasta ama marka ay isbedesho xaaladaada;
- Kusiiyo waqti kugu filan si uu u bixiyo macluumaada loo baahanyahay;
- U sheego mushkiladaha aad kuqabtid qorshahaaga daryeelka ama qorshahaaga taageerada marka ay soo baxaan;
- Ixtiraamo xuquuqahaaga oona bixiyo caawimaad dheeri ah oo kusaabsan helida adeegaha haddii aad qabtid daciifnimo jirka, dareenka, neerfaha, ama maskaxda ah; iyo
- Kugu caawiyo in aad heshid daryeel bixiye u qalma haddii aadan awoodin in aad mid hesho.

## Dukumeentiga Qoran Ee Aad Kusheegayso Nooca Daawada Aad Jeceshahay

Waxaad xaq u leedahay in aad sameyso tilmaamo horumarsan. Tilmaamaha horumarsan waxaa ka mid noqon kara dardaaranka nolosha ama awoodda qareenka ee waarta ee loogu talagalay daryeelkaaga caafimaadka. Tilmaamaha horumarsan ayaa waxaa ay koobayaan waxa aad jeceshahay ee ku saabsan daawada iyo/ama daryeelka caafimaadka maskaxda, oo ay ka mid yihiin xaqa aad ku aqabasho ama ku diido daawada, caafimaadka maskaxda, ama daaweynta qalliinka, marka aadan haysan awooda maskaxda aad ku gaari karto go'aamadaasi. Waad burin kartaa tilmaamahaaga horumarsan waqti kasta.

## Adeegga Diiwaangelinta Cod-bixiyaha

Qaanuunka Qaranka Ee Kusaabsan Isdiiwaan gelinta Coddeeyaha ee 1993 ayaa wuxuu uga baahan yahay dhammaan gobolada in ay kabixiyaan caawimaada isdiiwaan gelinta coddeeyaha tooska xafiisadooda caawimaada dadweynaha. Codsashada si la isku diiwaangeliyo ama ka noqoshada diiwaangelinta lagu coddeeyo ma ahaan doonto mid saameysa adeegaha ama tirada dheefaha ay dhici karto in lagaa siiyo dhinaca wakaaladan. Haddii aad jeceshahay caawimaad laguugu caawiyo buuxinta foomka diiwaangelinta qofka coddeeya, waan kugu caawin doonaa. Go'aankaaga ku aadan in aad isdiiwaan gelisid ama kanoqotid isdiiwaan gelinta wuxuu ahaan doonaa mid sir ah waxaana keliya loo isticmaali doonaa ujeeddooyin isdiiwaan gelinta coddeeyaha ah. Haddii aad aaminsantahay in qof lagu wareejiyay xuquuqahaaga diiwaangelinta ama si looga laabto isku diiwaangelinta lagu codeeyo, xaqa aad u leedahay in aad hawlahaaga khaas u noqotid ee ah go'aansashada haddii la isdiiwaangelinayo ama codsashada si la isku diiwaangeliyo in lacodeeyo, ama xaqaaga aad kudooratid xisbigaaga siyaasadeed ama doorasho siyaasadeed kale, waxaad fayl cabasho u diri kartaa dhinaca:

Washington State Elections Office
PO Box 40229
Olympia WA 98504-0229
1-800-448-4881

## Sixiixaaga

Sixiix sadarka hoose haddii aad fahansantahay xuquuqahaaga iyo masuuliyadahaaga oona fahansantahay masuuliyadaha shaqaalaha kiiskaaga.

______________________________
SIXIIXA MACMIILKA

______________________________
TAARIIKHDA

______________________________
SIXIIXA WAKIILKA SHARCIGA AH

______________________________
TAARIIKHDA

Ogeysiis loogu talagalay macaamiisha iyo shaqaalaha (Madaxa VI iyo VII) Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington waa loo-shaqeeye bixisa fursad shaqo loo siman yahay mana ku takooraysa dadka meel shaqo kasta, barnaamijyadeeda ama adeegyadeeda oo ku saleysan da'da, nooca jinsiga, jihayn galmo, lab iyo dheddig, aqoonsiga jinsiga/fikrad dhiibasho, xaalad guur, isir, caqiido, midab, asal dhallasho, diin ama waxa uu qofku aaminsan yahay, aaminsanaanta fikrad siyaaseed, xaalad ciidan, halyeeynimo hore oo si sharaf leh ciidanka uga fadhiistay, Casrigii Fiitnaam, hadda kala tagsan ama xaalado halyeeynimo hore oo la ilaaliyay, jiritaanka naafo xaga dareenka, maskaxda, jirka ah ama in la isticmaalo eey loo tababaray hagid ama xayawaan adeeg oo uu adeegsado qof naafo ah, lagac bixin loo siman yahay ama macluumaad hido ama fir ah.

**Xuquuqahaaga iyo Masuuliyadahaaga Marka Aad Hesho Adeegaha Laga bixiyo dhinaca Maamulka Taageerada Mudada-Dheer iyo Da'weynaanta iyo Maamulka Horumarinta Naafooyinka**

TILMAAMAHA

1. U bandhig foomkaan macmiilka marka aad buuxinaysid qiimeynta DARYEELKA biloowga ah oona muraajaceynaysid qorshaha daryeelka ama qorshaha taageerada. Haddii uu macmiilku hore u qaadanayay adeegaha oona hore u sixiixin nuskhada foomkaan, u bandhig foomka macmiilka qiimeynta xigta. Muraajaco kula samee foomka macmiilka si aad uga jawaabto wax kasta oo su'aalo ah oo kusaabsan xuquuqaha macmiilka iyo masuuliyadaha.
2. Ha sixiixo macmiilka ama wakiilka macmiilka labbo nuqul oo foomka ah si uu u sheego fahankiisa/fahankeeda kusaabsan xuquuqaha macmiilka iyo masuuliyadaha marka aad qaadanaysid adeegaha laga bixiyey dhinaca Maamulka Taageerada Mudada-Dheer iyo Da'weynaanta iyo Maamulka Horumarinta Naafooyinka.
3. Geli hal nuqul oo foomka ah gudaha faylka adag ama Nidaamka Maamulida Dukumeentiga (DMS) kadibna sii nuqulka kale macmiilka.